IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

Sannadka 14aad Muqdisho 24ka Abriil 1986 L. 1R4

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 11 ee 17 Maarso 1986, Oggolaansho Meelmarin heshiis amaaheed la xiriira Warshadda Shamiintada Berbera. Bog; 276

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 4 ee 13 Maarso 1986, Billad Maar ah ee Hawlkarnimo. » 277

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 5 ee 13 Maarso 1986, Billad Qalin ah oo Hawlkarnimo. » 279

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 6 ee 13 Maarso 1986, Billad Maar ah ee Waddaninnimo. » 281

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 7 ee 17 Maarso 1986, Meel-marin heshiis amaaheed la xiriira Warshadda Shamiintada Berbera. » 284

DECREE N. 7 on 17 March 1986, Instrument of Ratification. » 285

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 8 ee 22 Maarso 1986, Billad Maamuus ee Xiddigta Soomaaliyeed. » 286

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, L. 1 ee 12 Jen. 1986, Heshiis Dhexmaray Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Shirkadda Import Export Trader. » 287

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM. » 289

DOWLADDA HOOSE XAMAR, 7.4.86, Naado Dhul J.le Xuseen Xaaji Xasan L.154/bis. » 290

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 24.3.86, Lumid Buug-Kayd L. 23726 ku qoran Maxamed Baroow Axmed L. 155 » 291

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 27.2.86, Lumid Jeeg War. L. 0443355 ku qoran Bootaan Ayaanle Muuse L. 156 » 292

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.3.86, Lumid Jeeg. War. L. 621828 ku qoran Cibaado Xasan Xaaji Axmed L. 157 » 293

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.3.86, Lumid Jeeg. War. L. 526716 ku qoran Cusmaan Muuse Maxamed L. 158 » 294

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.3.86,
Lumid Buug-Kayd L. 27386 ku qoran » 295
Maxamed Jaamac Yuusuf L. 159

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.4.86,
Lumid Jeeg War. L. 0507361 ku qoran » 296
Cabdullaahi Xasan Diini L. 160

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 6.4.86,
,Lumid Jeeg War. L. 636961 ku qoran » 297
Ibraahim Xasan Axmed L. 161

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.4.86,
Lumid Jeeg War. L. 0275465 ku qoran » 298
Cabdi Cali Kaarshe L.162

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.4.86
Lumid Jeeg War. L. 0413807 ku qoran » 299
Cabdirisaaq Yuusuf Diiriye L. 163

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 8.4.86
Lumid Jeeg War. L. 0427680 ku qoran » 300
Cabdirisaaq Yuusuf Diiriye L. 164

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 10.4.86,
Lumid Jeeg War. L. B0061687 ku qoran » 301
Abshir Aw-Cali Ciise L. 166

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.4.86,
Lumid J g War. L. 0001215 ku qoran » 302
Mashruuca Fidinta Beeraha L. 167

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 20.4.86,
Lumid Jeeg War. L. 0061908 ku qoran » 303
Tahliil Daleel Diirshe L. 168

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.4.86,
Lumid Jeeg War. L. 704727 ku qoran » 304
Ciise Cumar Maxamed

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.4.86,
Lumid Jeeg War. L. 0307010 ku qoran » 305
Ciise Cumar Maxamed

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 19.4.86,
Lumid Jeeg War. L. 0307011 ku qoran » 306
Ciise Cumar Maxamed

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI Lambar 11, taariikh 17.3.1986: Oggolaansho meelmarin heshiisamaaheed la xiriira Warshadda Shamiintada **Berbera.**

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta heshiis la xiriira Warshadda Shamiintada Berbera, kuna saabsan amaah lacageed oo dhan F.F. 110.000.000/=.

2. Heshiiskan waxaa lagu kala saxiixday magaalada Muqdisho ee Dalka Soomaaliya taariikhdu markey ahayd 19 Febraayo 1986.

3. Heshiiskan wuxuu ka mid yahay sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha uu qorayo Heshiiska ku tilmaaman Qodobka 1aad ee Sharcigan waxaa dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka JDS iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana awood loo siiyey in uu meelmariyo Heshiiska Sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.3.1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

# QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 4 ee 13 Maarso 1986 Billad Maar ah ee Hawlkarnimo lagu maamuusay 20 Jaalle oo ka mid ah Madaxdii, Ciidammadii, Shaqaalhii iyo Beeraleydii Dadweynihii kaalinta hore ka galay fulinta hawsha marxaladdii goynta iyo xididda-siibka Beerihii Qaadka ee Dalka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo Warbixinta Guddoomiyaha Guddiga Qaranka Dabargoynta Qaadka;
MARKUU TIXGELIYEY: Hawlkarnimada lagu gaaray guusha la taaban karo ee wax ku ooolka ah ee laga soo hooyey Ciribtirka Qaadka muddadii uu dhaqan galay Sharciga lagu joojiyey gaar ahaan baabi'intii Beerihii Qaadka ee Dalka ku yiilay;
MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Hawlkarnimo, niyad sami iyo geesinimo iyo iyagoo si hagar la'aan ah u gutay waajibaadkii ka saarnaa, la guddoonsiiyo aqoonsiga uu ka mudanyihiin Ummaddooda, lagana reebo raad wax ku ool ah;
MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS;

WUXUU SOO SAARAYAA
Qodobka Keliya

XEERKA SOO SOCDA:

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAR AH EE HAWLKARNIMO Jaallayaasha hoos ku qoran oo ka qeyb qaatay Hirgelinta Ciribtirka Qaadka:

1. G/Dhexe Cumar Xaaji Maxamed (gaagaale)- Guutada Gabilay;
2. G/Dhexe Maxamed Axmed (Shaanle)- Guutada Arabsiyo;

3. Jaalle Guuleed Ayaanle Axmed;- K/S Xog. Gud. XHKS Deg. Hargeysa;
4. Jaalle Xaashi Muuse;- Gudd. Golaha Shacbiga Deegaanka Degmada Hargeysa;
5. Dhamme Cabdirashiid Xasan Gaashaan;- Taliyaha Ciidanka Guulwayaasha G/Sanaag.
6. Jaalle Maxamed Cali Yoonis;- Isuduwaha A.D.C. G/W/Galbeed;
7. Jaalle Ilyaas Maxamuud Xasan;- Madaxa Mashruuac Fidinta Beeraha G/W/G.;
8. Jaalle Cabdiraxmaan Siidow Cabdi (SONNA)- Weriyaha Gudd. Baabi'inta Beeraha Qaadka;
9. Jaalle Cabdulqaadir Axmed Cilmi - Isuduwaha W/Beeraha G/Togdheer;
10. Jaalle Cabdullaahi Ciise Ismaaciil - Isuduwaha ONAT G/Togdheer;
11. Jaalle Xasan Xaaji Cabdullaahi (Godey) - Isuduwaha W/Beeraha G/Sanaag;
12. Jaalle Cabdi Jaamac - Maamulaha D/Hoose ee Degmada Sheekh;
13. Jaalle Sulub Cali Amaan - Xoghayaha Gudd. Baabi'inta Beeraha Qaadka
14. J.le Axmed Cali Colhaye - Xubin Guddiga Fulinta Baabi'inta Beeraha Qaadka;
15. Jaalle Ismaaciil Xasan Faarax - Xubin Guddiga Fulinta Baabi'inta Beeraha Qaadka;
16. Jaalle Maxamuud Maxamed Cigaal - Wakiilka XHKS ee Mashruuca Fidinta Beeraha;
17. X/LE Xasan Maqtal Rafle - Qaybta 21aad eeX.D.S.
18. K/1aad Maxamed Nuur Warsame - Ururka 91aad Booliska Dableyda Xamar;
19. G/LE Cabdulle Cali Calasow - Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Waqooyi Galbeed;
20. G/le Cabdinuur Maxamed Cusmaan - Qaybta 26aad X.D.S. Hargeysa.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo;

Muqdisho, 13 Maarso 1986

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 5 ee 13 Maarso 1986 Billad Qalin ah oo Hawlkarnimo lagu Maamuusay 10 Jaalle oo ka mid ah Madaxdii, Ciidamadii, Shaqaalihii iyo Beeraralaydii dadweynihii kaalinta hore ka galay fulinta hawsha Marxaladihii Goynta iyo Xididda-Siibka Beerihii Qaadka ee Dalka Billad Qalin Hawlkarnimo.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo Warbixinta Guddoomiyaha Guddiga Qaranka Dabargoynta Qaadka;

MARKUU TIXGELIYEY: Hawlkarnimada lagu gaaray guusha la taaban karo ee wax ku oolka ah ee laga soo hooyey Ciribtirka Qaadka muddadii uu dhaqan galay Sharciga lagu joojiyey gaar ahaan baabi'intii Beerihii Qaadka ee Dalka ku yiilay;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Hawlkarnimo, niyad sami iyo geesinimo iyo iyagoo si hagar la'aan ah u gutay waajibaadkii ka saarnaa, la guddoonsiiyo aqoonsiga uu ka mudanyihiin Ummaddooda, lagana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS;

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka Keliya

XEERKA SOO SOCDA:

Waxaa lagu maamuusay BILLAD QALIN HAWLKARNIMO AH Jaallayaasha hoos ku qoran oo ka qayb qaatay Hirgelinta Ciribtirka Qaadka:

1. S/Guuto Maxamed Xaashi Gaani, Taliyaha Qaybta 26aad ee X.D.S.
2. Jaalle Maxamed Cali Abuukar, Maareeyaha Guud ee Mashruuca Fidinta Beeraha;
3. G/Sare Ibraahim Cabdi Nuur, Xog. Guddiga XHKS ee G/W/Galbeed;

4. G/Dhexe Subeer Cabdikariim Boodhle, Gudd. Maamulka Daw. ee G/Awdal;

5. G/Sare Cusmaan Maxamed Samatar, Abbaanduulaha Qaybta 26aad X.D.S.

6. G/Sare Jaamac Maxamuud Cawaale, Taliyaha Gaaska 2aad;

7. G/le Aadan Buule Maxamuud, Gudd. Maamulka Daw. Degmada Hargeysa;

8. Jaalle Jaamac Maxamed Cigaal, Madaxa Waaxda Nabad. Cadaaladda Guddiga XHKS ee G/Banaadir;

9. Jaalle Cabdullaahi Xalane Nuur, Maareeyaha Guud ee Wakaaladda ONAT ahna Guddoomiyaha Guddiga Xididda-Siibka Beeraha Qaadka;

10. Jaalle Cabdi Xasan Shirwac, K/Xigeenka Maareeyaha Mashruuca Mugaambo.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo;
Muqdisho, 13 Maarso 1986

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 6 ee 13 Maarso 1986 Billad Maar an ee Waddaninnimo lagu maamuusay 30 Jaalle oo ka mid Madaxdii, Ciidamadii, Shaqaalihii, Beeraleydii iyo dadweynihii kaalinta hore ka galay fulinta hawsha Marxaladdii Goynta iyo Xididda-Siibka Beerihii Qaadka ee Dalka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Qoraallada iyo Warbixinta Guddoomiyaha Guddiga Qaranka Dabargoynta Qaadka;

MARKUU TIXGELIYEY: Hawlkarnimada lagu gaaray guusha la taaban ee wax ku oolka ah si Waddaninnimadu ku dheehantahayna laga soo hooyey Ciribtirka Qaadka muddadii uu dhaqan galay Sharciga lagu joojiyey gaar ahaan baabi'intii Beerihii Qaadka ee dalka ku yiilay;

MARKUU TIXG3LIYEY: inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey Waddaninnimo niyad sami iyo Geesinimo iyo iyagoo si hagar la'aan ah u gutay waajibaadkii ka saarnaa, la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudan yihiin Ummaddooda, lagana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS;

WUXUU SOO SAARAY

QODOBKA KELIYA

XEERKA SOO SOCDA:

Waxaa lagu maamuusay BILLAD MAAR AH EE WADDANINNIMO 30 Jaalle ee hoos ku qoran oo ka qayb qaatay Hirgelinta Ciribtirka Qaadka:

1. Jaalle Xaaji Cabdulla Axmed Saalax - Beeraley Qaad ee Degmada B/Burte;
2. Jaalle Sheekh Cabdullaahi Xuseen Buux - Beeraley Qaad ee Degmada Gabiley;
3. Jaalle Siraad Xuseen Buux - Beeraley Qaad ee Degmada Gabiley;
4. Jaalle Cali Buraale Xasan - Beeraley Qaad ee Degmada Arabsiyo;
5. Jaalle Sheekh Maxamed Raage - Beeraley Qaad ee Degmada C/Bardaale;
6. Jaalle Maxamed Qoofal Aadan - Beeraley Qaad ee Degmada Hargeysa;
7. Jaalle Axmed Sheekh Cabdi Dhagaqol - Beeraley Qaad Degmada Hargeysa;
8. Jaalle Sahra Cabdullaahi Nuur - Beeraley Qaad Degmada Hargeysa;
9. Jaalle Faaduma Xaaji Axmed - Beeraley Qaad ee Degmada Afgooye;
10. G/le Maxamed Axmed Jaamac - Qaybta 26aad X.D.S. Hargeysa;
11. Dh/me Cabaas Maxamed Caddow - Tal/C/Guulwadayaasha Ummadda ee Gobolka Togdheer;
12. Xuseen Cumar Barre - Taliyaha Nabadsugidda Degmada Gabiley;
13. Jaalle Cabdulle Jaamac Aadan - Xafiiska Dif. Qaranka ee Deg. Gabiley;
14. Jaalle Maxamed Mahdi Aadan - Isuduwaha ONAT Gobolka W/Galbeed;
15. Jaalle Saleebaan Jaamac Maxamuud - Gudd. Ururka Shaqaalaha G/W/Galbeed;
16. Jaalle Nuur Caynta Cali - Garsoore Maxkamadda Bad. Dalka ee Gobolka W/Galbeed;

17. Jaalle Aw-Aadan Raage Wacays - Dadweynaha Degmada Gabiley;
18. Jaalle Caydiid Ducaale Warsame - Dadweynaha Degmada Gabiley;
19. Jaalle Sucaado Nuur Geedi - Dadweynaha Degmada Gabiley;
20. Jaalle Xasan Jaamac Warsame - Dadweynaha Degmada Hargeysa (Cadadley);
21. Jaalle Xasan Caddow Muunye - Maareeyaha Mash. H.W. Galbeed;
22. Dhamme Saxardiid Askar Maxamed - Xoghayaha Degmada Hargeysa;
23. Dhamme Faarax Salaad Gaani - Xoghayaha Degmada Burco;
24. L/X/le Xuseen Axmed Faarax - Xog. Gudd. XHKS Deg. Oodweyne;
25. L/X/le Maxamed Faarax Cabdulle - Xog. Gudd. XHKS Deg. Badhan;
26. Jaalle Xasan Xaaji Maxamed - Isuduwaha Was/Beeraha G/W/Galbeed;
27. G/le Jaamac Maxamed Jaamac - Xog. Gudd. XHKS Deg. Sheekh;
28. G/le Maxamed Aadan Cabdullaahi - Taliyaha Saldhigga Bol. Gabiley;
29. G/Sare Maxamed Cabdi Geelle Taliyaha Qaybta Bol. G/Sanaag;
30. G/le Xasan Siciid Cilmi - Taliyaha C/G/wadeyaasha Umm. G/W/Galbeed.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo;

Muqdisho, 13.3.1986

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 7 ee 17.3.1986: Meelmarinta heshiis amaaheed la xiriira Warshadda Sahmiintada Berbera.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Faqradda 5aad, Qodobka 67aad iyo faqradda 4aad, Qodobka 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 11 ee 17ka Maarso 1986 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska Xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska amaaheed ee dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Dhexe ee Iskaashiga Dhaqaale ee Fransiiska (Caisse Centrale), laguna kala saxiixday Magaalada Muqdisho taariikhdu markey ahayd 19ka Feberaayo 1986.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa awood sharci.

Qod. 3aad

Xeerkanu wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 17.3.1986

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Decree no. 7, of 17 March 1986; Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Article 67, para 5 and the Article 82, para 4 of the Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The Law No. 49 of 23 Disembar 1984;

HAVING SEEN: The Law No. 11, of 17 March 1986 on the base of wihch the People's Assembly has approved the Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATES

The following Decree:

Article I

The loan facilities Agreement between the Somali Democratic Republic and Caisse Centrale de coopertion economique, signed in Mogadishu on 19 February 1986, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have a force of lawin the territory of Somali Democratic Republic.

Article III

This Decree shall come into force upon signature by the President of Somali Democratic Republic and shall be Published on Official Bulletin of the State.-

Mogadishu, 17 March 1986

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 8 ee 22 Maarso 1986 Billad Maamuus ee Xiddigta Soomaaliya «Cavaliere di Grande Stelle» oo lagu maamuusay H. E. LI XIANNIAN President of the People's Republic of China.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS.;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Siyaasadda;

MARKUU TIXGELIYEY: Kaalinta Weyn uu ka Geystay adkeynta iyo sii xoojinta xiriirka labada waddan Soomaaliya iyo Shiinaha;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyey niyad sami, si kaashi iyo horumarin labada Ummadood, la guddoonsiiyo Aqoonsiga uu ka mudanyahay Ummadda Soomaaliyeed iyo Dawladeedaba, loogana reebo raad wax ku ool ah;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS.;

WUXUUSOO SAARAYAA

Qodobka Keliya

Xeerka soo socda:

Waxaa lagu maamuusay Billad «CAVALIERE DI GRANRE STELLA» ee Xiddigta Soomaaliya H. E. LI XIANNIAN President of the People's Republic of China.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynaha J.D.S. uu soo saxiixo.

Muqdisho, 22.3.1986

MADAXWEYNAHA JDS
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA L. 2 ee 12 Jen. 1986: Heshiis dhexmaray Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Shirkadda Import Export Trader.

WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J. D. S.;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Ir. 30 ee 30.7.1984 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Xeer Ir. 2 ee 29.12.1961 ee ku saabsan xisaabaadka maamulka Dawladda;

ISAGOO ARKAY: Heshiiska ay saxiixeen labada dhinac;

ISAGOO TIXGELIYEY: Jiilaalka adag ee ku habsaday qaar ka mid ah Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday heshiiska dhexmaray Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Shirkadda Imjort, Export Trader, kuna saabsan sameyn 100 (boqol) Haamo biyood.

Qod. 2aad

Labada dhinac waxay ku heshiiyeen in sameynta haamaha biyaha ku baxo lacag dhan Sh.So. 23.680.000.-

Qod. 3aad

Shirkadda Import, Export Trader, wuxuu sameynta haamaha biyaha ku xusan qodobka 1aad ku dhammeyn doonaa muddo hal bil, haddii ayan imaanin quwad hakin karta hawsha, laga bilaabo waqtiga la kala saxiixday heshiiska.

Qod. 4aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Jannaayo 1986

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay

Diiwaanka lambar 1 bogga lamb. 2

Muqdisho, 2 Feb. 1986

Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

(S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla)
XUBIN GUDDIGA SIYAASADDA
WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

DAWLADDA HOOSE E XAMAR
Waaxda Dhulka Rasmiga ah

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Xuseen Xaashi Xasan uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dowladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 30.3.86 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Qaabkiisu yahay Trabezio Addimihiisuna yihiin (115 + 160X200 = kuna fadhiya mq. 27.500.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Afgooye

Koofur waxaa ka xiga: Goof dad

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada u dhexeysa Buuni iyo Xasan

B a r i waxaa ka xiga: Goof dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmgia ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 7 Abriil 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/H.
Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 154/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 23726 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 2.000/= uu iska lahaa Maxamed Baroow Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0000546 Taariikhdeeduna tahay 24.3.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod-69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 23726 ku qoran Maxamed Baroow Axmed ayna ku jirto Sh.So. 2.000/=.

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xarunta u bedelo Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.3.1986

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 155

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

UJ:- Baafin Jeegga Wareega ee Lam. 0443355.
Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Jeegga Wareega Lumay;

HADDUU ARAYK: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco ee Tr. 27.2.86;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65,-) Lumid Jeegga Wareega ee Lam. 0443355 ee ku qoran Jaalle Xuseen Jaamac Maxamed lagana sameeyey L. Burco Tr. 21.12.85 kuna jirtay Sh.So. 100,000/=;

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo, Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan Jaalle Bootaan Ayaanle Muuse marka ay ka ka wareegto 20 casho gudahood laguna Shaaciyo X. Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Bootaan Ayaanle Muuse iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, 27.2.1986

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

(Jaamac Cabdillaahi Bille)

L. 156

MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

UJ:- Baafin Jeegga W. ee Lam. 0179252
Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco

HADDUU ARKAY: Codsiga uu soo qortay Cabdi Saciid Cabdille ee Tr. 23.1.86 ee ku saabsan Baafin Jeegga War. Lam. 0178252;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65,-) Lumid Jeegga Wareega ee kor ku xusan ee uu ku qoran yahay Ibraahin Ciise Yaasiin kana lumay Cabdi Saciid Cabdille lagana sameeyey L. Burco Tr. 11.8.85

WUXUU AMRAYAA

In loo Cusbooneysiiyo, Jeeggaas Wareega ee kor ku xusan Jaalle Cabdi Saciid Cabdille markii ay ka soo war gto 20 casho laguna Shaaciyo Xafiiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegga Cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Cabdi Saciid Cabdille iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, 23.1.1986

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco
(Jaamac Cabdiilaahi Bille)

L. 157

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga dhumay uu lambarkiisu ahaa 621828 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 15.000/= uu iska lahaa Cibaado Xasan Xaaji Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000592 Taariikhdeeduna tahay 31.3.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU FARAYAA

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/Wareega Lam. 621828 ee ku qoran Cibaado Xasan Xaaji ayna ku jirto Ss.So. 15.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xarunta u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.3.1986

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 158

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga dhumay uu lambar kiisu ahaa 526716 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Cusmaan Muuse Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 6984 Taariikhdeeduna tahay 31.3.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 526716 ee ku qoran Cusmaan Muuse Maxamed ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Koowaad u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una samee yo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 1g maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.3.1986

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 159

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 27386 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 18.000/= uu iska lahaa Maxamed Jaamac Yuusuf sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000579 Taariikhdeeduna tahay 30.3.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 27386 ee ku qoran Maxamed Jaamac Yuusuf ayna ku jirto Sh.So. 18.000/=.

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Xarunta u bedelo B/Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo so mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.3.1986

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 160

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay ee lambarkiisu ahaa 0507361 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Cabdullaahi Cali Diini sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 3615 Taariikhdeeduna tahay 3-4.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod- 69 Sharciga L-2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0507361 ee ku qoran Cabdullaahi Cali Diini ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Labaad u bedelo Jeegga War- ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6-4.1986

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 161

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga dhumay oo lambar kiisu ahaa 636961 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 10.000/= uu iska lahaa Ibraahim Xasan Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 3615 Taariikhdeeduna tahay 3.4.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 636961 ee ku qoran Ibraahim Xasan Axmed ayna ku jirto Sh:So. 10.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.4.1986

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 162

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdi Cali Kaarshe Tr. tahay 5.4.86;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeegga Wareega Lam. 0275465 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Cabdulqaadir Xaaji Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 3686 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 0275465 lagana sameeyey Laanta Kismaayo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Cabdulqaadir Xaaji Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Kismaayo ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Cabdi Cali Kaarshe lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000/= ee ku qoran Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.4.86

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 162/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdiraxmaan Yuusuf;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 0413807 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Cabdirasaaq Yuusuf Diiriye sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 3688 Taariikhdeeduna tahay 5.4.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 0413807 ee ku qoran Cabdirasaaq Yuusuf Diiriye ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horrey sa aan wax wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.4.1986

GARSOORAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 163

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 0413680 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000/= uu iska lahaa Cabdirisaaq Yuusuf Diiriye sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 3688 Taariikhdeeduna 5.4-86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9-65.

XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 0413680 ee ku qoran Cabdirisaaq Yuusuf Diiriye ayna ku jirto Sh.So. 100-000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8-4-1986

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 164

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay ee lambarkiisu ahaa B0061687 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 35.000/= uu iska lahaa Abshir Aw-Cali Ciise sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 4911 Taariikhdeeduna tahay 8.4.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar B0061687 ee ku qoran Abshir Aw-Cali Ciise ayna ku jirto Sh:So. 35.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Koowaad u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una samee yo mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 1g maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.4.1986

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 165

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Bay Region Agricultural.

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeegga Wareega Lam. 0001215 lagana sameeyey Bangiga Dhexe Qaybta Hawsha Bangiga kuna jirto lacag dhan Sh.So. 200.000/= kuna qoran magaca BAY REGION AGRICULTURAL BROJECT sida ku cad warqadda lam. 1521 tr. 5.4.86 kana soo baxday Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed Qaybta Hawsha Bangiga;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega Lam. 0001215 lagana sameeyey Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 200.000/= kuna qoran magaca Bay Region Agricultural.

WAXAA LA AMRAYAA

Qaybta Hawsha Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed in uu siiyo Mashruuca Fidinta Beeraha lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 200.000/= oo ku qornayd Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.4.1986

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 166

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cumar Maxamed Guuleed;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu dhumay Jeeg lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran magaca Ciise CCumar Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 4046 tr. 17.4.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Qaybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 704727 lagana sameeyey Laan. Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Ciise Cumar Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/=.

WAXAALA AMRAYAA

Laanta Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cumar Maxamed Guuleed lacagta cadadkeedu yahay Sh. So. 50.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega oo kor ku qoran, marka ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.4.1986

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 167

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cumar Maxamed Guuleed;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu dhumay Jeeg lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Ciise Cumar Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 4046 tr. 17.4.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 0307010 lagana sameeyey Laan. Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Ciise Cumar Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAALA AMRAYAA

Laanta Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cumar Maxamed Guuleed lacagta cadadkeedu yahay Sh. So. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega oo kor ku qoran, marka ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.4.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 168

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cumar Maxamed Guuleed;

HADDUU TIXGELIYEY: in uu dhumay Jeeg lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Ciise Cumar Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 4046 tr. 17.4.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Xis-Guud;

Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar. 0307011 lagana sameeyey Laan. Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Ciise Cumar Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAALA AMRAYAA

Laanta Dh/Mareeb ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cumar Maxamed Guuleed lacagta cadadkeedu yahay Sh. So. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega oo kor ku qoran, marka ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.4.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdi Salaad Shangole

L. 169

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Tahliil Daleel Diirshe;

HADDUU TIXGELIYAY: in uu dhumay Jeeg Wareega lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh-So. 45.000/= kuna qoran magaca Tahliil Daleel Diirshe sida ku cad warqadda Lam. ——— tr. 16-4-86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 0061908 lagana sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Tahliil Daleel Diirshe ayna ku jirto Shs. 45.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Tahliil Daleel Diirshe lacagta cadadkeedu yahay Sh-So. 45.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega oo kor ku qoran, marka ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.4.1986

GUDDOOMIYAHA MBB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 168

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdulqaadir Faarax Aadan;

HADDUU TIXGELIYAY: in uu dhumay Jeeg Lam. 707601 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000/= kuna qoran magaca Cabdulqaadir Faarax Aadan sida ku uad warqadda Lam. 2490 tr. 19.4.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 707601 lagana sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdulqaadir Faarax Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaailyeed in uu siiyo Jaalle Cabdulqaadir Faarax Aadan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 20.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega oo kor ku qoran, marka ay ka soo wareegtomuddo aan ka yarayn 15/Beri laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.4.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 170

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdulqaadir Faarax Aadan;

HADDUU TIXGELIYAY: in uu dhumay Jeeg Lam. 707602 lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 20.000/= kuna qoran magaca Cabdulqaadir Faarax Aadan sida ku uad warqadda Lam. 2490 tr. 19.4.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Labaad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 ee 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lambar 707602 lagana sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Cabdulqaadir Faarax Aadan.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaailyeed in uu siiyo Jaalle Cabdulqaadir Faarax Aadan lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 20.000/= ee ku qornayd Jeegga Wareega oo kor ku qoran, marka ay ka soo wareegtomuddo aan ka yarayn 15/Beri laga bil'aabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.4.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 171

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lam barkiisu ahaa 1011 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna qoran lacag dhan Sh.So. 350.000/= uu iska lahaa Maxamuud Maxamed Eybakar sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 2087 Taariikhdeeduna tahay 8-4.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L.2 ee 9.9-65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 1011 ee ku qoran Maxamuud Maxamed Eybakar ayna ku jirto Sh-So. 350.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Wardhiigley u bedesho B/Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka ka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9-4.1986

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Axmed;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 0658888 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Afgooye kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000/= uu iska lahaa Maxamuud Maxamed Daahir sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 3753 taariikhdeeduna tahay 7.4.86 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L.2 9.9.62.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0658888 ee ku qoran Maxamuud Maxamed Daahir ayna ku jirto Sh.So. 50.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Afgooye u bedelo Jeegga War. ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin, lana siiyo ruuxa wata oo ah Xasan Axmed Xasan.

Muqdisho, 10.4.1986

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)